

MINNESOTA

Deeqaha Dhaqaale ee COVID ee Dadka Caadiga ah



YAA SOO CODSAN KARA?

Meheradaha ay leeyihiin oo ay ka shaqeeyaan dadka reer Minnesota ee caddeyn kara dhaqaale-xumo uu ku keenay xanuunkii safmarka ahaa ee COVID-19. Dadka soo codsanaya waxay helayaan deeq gaareysa \$10,000 ilaa \$25,000 oo waxa ay ku xiran tahay tirada shaqaalaha ugu shaqeeya si buuxda (FTEs).

Shuruudaha kale waxaa ka mid ah:

- In ay meheraddu noqoto mid aan macaash-doon ahayn oo gaar loo leeyahay (oo uu dakhligooduna la mid yahay sida kuwa gaarka loo leeyahay), oo waa inay Minnesota xarunta ugu weyn u ahayd ugu yaraan ilaa iyo 1-dii Jannaayo, 2020.
- Waa in ay hadda meheraddu ku shaqeyneyso qorshe meherad oo sii soconeyso ilaa iyo 2022.
- Waa in ay ugu yaraan 50% leeyihiin hal ama laba qof oo ku nool Minnesota.
- Waa inay u shaqeeyaan shaqaale ka yar 200 oo qof oo joogto ah.
- Waa in uu dakhligooda macaashka guud yahay ugu yaraan \$10,000 canshuurtii sannadka ee 2020 ama 2019.

Habraaca xulashada waxaa mudnaanta koowaad lagu siinayaa meheradaha ay badankoodu leeyihiin ciidanka hawlgabka ah, dumarka, iyo Madowga, Dadka Asalkii Hore, iyo dadka tirada yar, ee ay u shaqeeyaan 6 qof ama ka yar, iyo/ama aan helin caawimaad hore oo ahayd barnaamijyadii kabista dhaqaale ee gobolka.

GOORMA AYAAN SOO CODSAN KARAA?

Kadinka intarnetka ee codsiga waxaa la furi doonaa 20-ka Sebtembar, 2021. Kadinka intarnetka waxa uu codsiyada aqbali doonaa 10 maalmood ka dib marka la furo. Codsiga waxaa ugu dambaysa 29-ka Sebtembar 11:59 habeennimo. Markaas ka dib, codsiyada lagu bixinayo deeqda ayaa la kala xulan doonaa iyada oo lagu kala heli doono habraac xulasho oo si teel-teel ah kambuyuutar loogu soo saarayo.

MAXAAN U BAAHNAHAY SI AAN U SOO CODSADO?

Waa in aad haysato cinwaan ah boostada intarnetka (email) gaar ku ah adiga ama meheraddaada si aad ugu isticmaasho kadinka intarnetka, waa inaad soo gudbiso codsiga, oo waa in aad ku hesho oo kala socoto xaaladda codsigaaga. Hal boosto oo ah intarnetka (email) laguma soo dirsan karo codsiyo badan oo meherado kala gaar ah.

Codsiga waxaa ku jira su'aalo kala duwan oo la xiriira meheraddaada, sida:

- Yaa iska leh meheradda?
- Halkee buu milkiiluhu ku nool yahay?
- Waa halkee goobta koowaad ee shaqada meheradda?
- Immisa shaqaale joogto ah ayaa meheradda ka shaqeeya?
- Waa maxay qorshehaaga sii-wadidda shaqada meheradda ee 2022?

Intaas waxaa sii dheer, waxaa lagu weydiin doonaa in aad intarnetka ku soo gudbiso waraaqo caddeyn u ah codsiga.

Caddeymaha la iska rabo waa:

- Waraaqihii canshuur-celiska gobolka iyo federaalka ee 2020.
- Waraaqaha xisaab-xirka koontada bangiga.
- Caddeynta shaqada meheradda ee Minnesota.
- Caddeyn ah sii-wadidda shaqada meheradda ee 2021.
- Caddeyn ah deggenaanshaha sida biilka korontada, leysan wadista baabuurka, iwm.

SU'AALO?

Fadlan akhriso liiska qeybta [Su'aalaha ilyo Jawaabaha \(FAQ\) ee ku jirta barteenna intarnetka](#) ka hor intaadan nala soo xiriirin. Si joogto ah wixii cusub ugala soco bogga FAQ.

Haddii aad weli wax su'aalo ah qabto, ku soo dir boostada intarnetka (email) MSCRG.DEED@state.mn.us.